



**Kanton Bern**  
**Canton de Berne**



# Dugsiga barbaarinta ee gobolka af Faransiiska looga hadlo ee Gobolka Bern Warbixinta ee waalidka

Informations à l'intention des parents Somali

**Direction de l'instruction publique et de la culture**



## 2 **Dugsiga barbaarinta ee gobolka af Faransiiska looga hadlo ee Gobolka Bern**

Warbixinta ee waalidka

### **Kooban**

Waaladiinta qaaliga ah.....	3
Ku soo dhawow dugsiga barbaarinta! .....	4
Ujeedooyinka waxbarashada iyo qaababka waxbarashada..	6
Taageerida hormarka .....	8
Iskaashiga u dhaxeeyo waaladiinta iyo macalimiinta .....	10
Hay'ada dugsiga barbaarinta.....	12
Daryeelka iyo caafimaadka canuga .....	14
Madaxa dugsiga, maamulada iyo adeegyada la gaareeyay .	15

### **Impressum**

#### **Edition et copyright**

Direction de l'instruction publique et de la culture  
Office de l'école obligatoire et du conseil  
oeco.inc@be.ch

Edition 2022

Download: [www.be.ch/ecole-obligatoire](http://www.be.ch/ecole-obligatoire)

## Waaladiinta qaaliga ah,

Hadeer in canugaaga gaaray da'da afar, isaga ama iyada waxaa laga diiwaangelinayaa dugsiga barbaarinta ee Agoosto. Ka diiwaangelinta canugaaga dugsiga barbaarinta waa munaasabad gaar ah ee aan aheyn kaliya canuga laakin sidoo kale adiga. Waxay la micna tahay in canugaaga lagu dhafay kooxda weyn oo carruur ah oo waxay aastaameysaa bilowga waxbarashadiisa ama waxbarashadeeda ee kow iyo tobanka sanno qasabka ah.

Sida waaladiin, waxaad sameyn kartaa tababarucid weyn ee guusha shaqadaan oo caawiyo canugaaga illaa shaqada dugsigiisa ama dugsigeeda oo ay la jiraan daryeelkaaga iyo taageeradaada.

Ku dhiirogeli canuigaaga inuu sameeyo sida badan ee suurtoogalka ah iqtiyaarkiisa. Xoojintaan isku kalsoonida shaqsiga ah, waxay ku dhiirogelisaa madaxbanaani oo sameysaa inay ku bilaabato dugsiga barbaarinta iyo nolosha sida xubinta koox balaaran wax badan sahlan.

Waxaan isugu kaa geynay warbixinta ugu muhiimsan adiga si markaas ay kuugu ogolaato inaad ka heshid sawir dhameys-tiran ee waxa adiga iyo canugaaga aad ka filan kartaan dugsiga barbaarinta.

Waxaan kuu rejeyneynaa adiga iyo canugaaga bilow wanaagsan oo aan dhibaato laheyn, waqti farxad ah ee dugsiga barbaarinta!

Waxda Waxbarashada

## Fadlan ogow

Degmooyinka qaarkood, dugsiga barbaarinta carruurta waxaa wax lala baraa carruurta ku jiro Sannadka 3aad iyo Sannadka 4aad ee dugsiga hoose (kooxyo da'yo isku qasan) oo dhammaan qeybaha maalinta (Basisstufe ama cycle élémentaire).

## **Ku soo dhawow dugsiga barbaarinta!**

### **Gelitaanka dugsiga barbaarinta**

#### **Entrée à l'école enfantine**

Gelitaanka dugsiga barbaarinta wuxuu furayaa adag oo cusub, ku ciyaaro oo ka waaya arag qaato canugaaga. Isaga ama iyada waxay la kulmayaan koox carruur ah oo dhibcooyin kala duwan ee hormarkooda, oo qaba baahiyo kala duwan, ku hadla luuqado kala duwan oo ka soo jeedo taariiqo bulsho iyo dhaqan kala duwan.

Si wadajir ah, carruurtaan waxay ku koraan bulsho dugsiga barbaarinta ah, oo midkood wada ciyaari karaan oo ay is bartaan. Dugsiga barbaarinta, canugaaga wuxuu helayaa fursada la iskugu dayayo waxyaabo cusub, oo lagu tijaabiyo laguna aasaaso. Waaya aragnimo kala duwan ee ku lugleh dhammaan dareemaha u ogolaanayo canugaaga inuu joogteeyo hormarinta fikradiisa ama fikradeeda ee waxyaabaha iyo xiriirada u dhaxeeyo iyaga.

### **Dugsiga barbaarinta**

#### **ee barayo shaqaalaha**

#### **Corps enseignant**

Fasalka, oo laga sameeyay carruur u dhexeyso da'aha afar iyo lix, waxaa hog-aamiyo macalinka dugsiga barbaarinta. Waxay ku xirantahay cabirka fasalka oo gaarayo, waa suurtoagal in macalin labaad ee dugsiga barbaarinta baro sidoo kale, ama caawiyaha fasalka ayaa taageeri karo macalinka inta lagu jiro casharada.

Macalinka ayaa ku dhiirogeliyo oo ku taageero canug walba si gaar ah sida waafaqsan kartiyaha canuga, xiisaha iyo heerka hormarka. Isaga ama iyada ayaa siiyo xoogaga, doortaa qaabab ku haboon ee waxbarashada, qorshooyinka howlaha ee maalin walba oo diyaariyaa qoraalada waxbarashada ee fududeysaa waaya aragnimo cusub iyo hormarka waxbarashada.

Dugsiga barbaarinta, canugaaga wuxuu helayaa fursada la iskugu dayayo waxyaabo cusub, oo lagu tijaabiyo laguna aasaaso. Waaya aragnimo kala duwan ee ku lugleh dhammaan dareemaha u ogolaanayo canugaaga inuu joogteeyo hormarinta fikradiisa ama fikradeeda ee waxyaabaha iyo xiriirada u dhaxeeyo iyaga.

## Ujeedooyinka waxbarashada iyo qaababka waxbarashada

### Le Plan d'études romand (PER)

Ku barida dugsiga barbaarinta waxay ku saleysantahay Plan d'études romand. Plan d'études ayaa ugu adeego macalimiinta sida tilmaame ku caawiyaa iyaga inay qor-sheeyaan casharadooda ee dugsiga barbaarinta illaa 9 ee dugsiga.

### Ciyaarida iyo waxbarashada

#### Jouer et apprendre

Ciyaarta waa mid ka mid ah qaababka ugu muhiimsan ee wax ku barashada dugsiga barbaarinta. Ciyaarta waxay u ogo-laataa carruurta inay ogaadaan oo raacaan wadooyinka waxbarashadooda gaarka ah. Ciyaarta waxay dhistaa madadaalada carruurta, ku dhiirogelisa inay ku dhaqmaan oo wax badan ka bartaan wax oo siisaa caqabadaha ku haboon iyo fursadaha tallaabada.

Dugsiga barbaarinta wuxuu ku qalabeysan yahay goobo kala duwan oo qani ku ah ciyaarida iyo waxbarashada, iyo canugaaga xor ayuu ka ahaanayaa si u go'aansado racfaanada isaga ama iyada ku socdaa oo maalin walboo la siiyay. Carruurta waxaa sidoo kale lagu dhiirogelinayaa inay isku dayaan qaababka ciyaarta iyo waxbarashada ee laga yaabo inaysan ku dooran iqtiyaarkooda.

Ku bilaabida xiisaha-xoojiya, waxbarashada dhacdana ah ee xaalada maalin walba iyo xaaladaha ciyaarta, waxbarashada waxay noqoneysaa mid aad diirada loo saaray oo aad u qaabeysan sida canugaaga ku hormaraya dhinaca dugsiga barbaarinta. Kartida carruurta ee looga soo kab-sanayo shaqooyinka horay loo qeexay iyo shaqooyinka kordhaa waqti kadib.

### Wax ka barashada midba midkale

#### Apprendre les uns des autres

Sida qeyb ka ah kooxda, canugaaga wuxuu la baranayaa oo ka baranayaa carruurta kale. Carruurta waxay bartaan in sharciyada ay yihiin sharciyada. Waxay bartaan sida nafsadooda si ku haboon loogula dhaqmo oo xaalado kala duwan iyo sida loo heshiisiyo xiisahooda ee kuwaas carruurta kale. Waxay ku dhaqmaan is xakameynta iyo isku kalsooni, oo isku dayayo inay helaan xalka xaaladaha qilaafka. Tani waxay sare u qaadaa hormarinta xirfadhooda xirfada.

### **Hormarka shaqsiga** **Développement personnel**

Carruurta sidoo kale waxay hormariyaan xirfadahooda gaarka ah ee dugsiya barbaarinta. Waxay ku jaheysanyihiin dhinacyada madax banaani weyn, qiyaasaa masuuliyad la wadaagay oo noqdaa shaqsiyaad iskooda u dhaqmayo. Sida ay sababtay, isku kalsoonidooda way korodhaa. Waxay bartaan inay diirada saaraan gaarista hadafka oo lagu xakameynayo dareemahooda gaarka ah. Waxay bartaan inay ka taxadaraan dareemahooda gaarka ah oo nafsadooda sameeyaan xaalada la siiyay sida waafaqsan. Carruurta waxay hormariyaan kalsoonida xirfadooda gaarka ah iyo kartiyaha oo ku wanaagsanaadaan qiimeyntooda.

### **Aasaasyada barashada** **farsamooyinka aasaaska** **Poser les bases nécessaires** **à l'acquisition des apprentissages** **scolaires**

Carruurta waxay bartaan sida loogu muujiyo nafsadooda iyo sida loo xiriiro, loogu xiriiriyo waaya aragnimada oo dhaqgeysto sheekooyinka. Tani waxay sare u qaadaa xirfadaha luuqadooda oo balaarisaa erayada. Dhageysiga ku dhawaaqyada iyo erayada oo heeso ah iyo laxanada waxay u diyaarisaa carruurta inay bartaan inay aqriyaan oo qoraan. Xirfadahooda dhaqdhaqaaqa iyo kartidooda lagu muujinayo booska iyo qaababka sidoo kale waxay sii wadaan inay hormaraan.

Carruurta waxay ogaadaan inay aqoonsadaan xiriirada iyo mabaadi'da ee xaalada isdhaxgalka ciyaarta buuxdo oo ay la jirto tayoooyinka iyo lambarada.

Carruurta sidoo kale waxay hormariyaan xirfadahooda gaarka ah ee dugsiya barbaarinta. Waxay ku jaheysanyihiin dhinacyada madax banaani weyn, qiyaasaa masuuliyad la wadaagay oo noqdaa shaqsiyaad iskooda u dhaqmayo

## Taageerida hormarka

### Taageerida iyo sare u qaadida

#### Soutenir et stimuler

Carruurta waxay la imaadaan baahiyo kala duwan, kartiyo, waaya aragnimo iyo xirfado dugsiga barbaarinta. Macalinka wuxuu cabirayaa heerka hormarka ee canug walba isaga oo kormeerayo canuga oo la hadlayo waalidkiisa ama waalidkeeda. Tani waxay u ogolaaneysaa macalinka inuu aqoonsado kartiyaha canuga, xirfadaha iyo xiisaha oo u go'aansadaa sheeyada weli ku adag isaga ama iyada. Macalinka ayaa kadib ku isticmaalaa aragtidaan waaya aragnimada carruurta iyo hormarka shaqsiga ee lagu qorsheynayo oo loola diyaarinayo shaqada carruurta.

### Taageerada dheeraadka ah

#### Soutien supplémentaire

Carruurta u baahan taageerada dheeraadka ah ee hormarkooda waxay helaan caawin jahada la saaray oo xoojisaa hormarka. Tusaale ahaan, iyada oo ay la jirto ogolaanshahaaga, taqasus dheeraad ah ayaa la shaqeyn karo canugaaga si sare ugu qaado luuqadiisa ama luuqadeeda ama hormarka dhaqaaqa.

### Faransiiska sida luuqada labaad

#### Français langue seconde (FLS)

Carruurta luuqadooda dhaladka aan aheyn Faransiiska waxay la yimaadaan dugsiga barbaarinta waaya aragnimo badan iyo erayada la xiriiro luuqadooda koowaad. Waxaa jiro illo laga heli karo dugsiga barbaarinta oo si gaar ah ugu qaabeysan dhinacyada ku caawinta carruurta ku korayo luuqado badan si ay u bartaan af Faransiiska.

Canugaaga wuxuu helayaa fudeed dheer ee bilowga dugsiga barbaarinta, si kastaaba, haddii isaga ama iyada mar horay fahmo luuqada waxbarashada oo ay fahmi karaan macalimiinta iyo carruurta kale ee ka imaado bilowga hore. Horaanta canugaaga la soo xiriiro luuqada af Faransiiskaka, sida fudud ee isaga ama iyada noqonayo si uu u barto. Canugaaga waa in la siiyaa fursado joogto ah oo la maqlo oo lagu hadlo af Faransiiska oo ugu yaraan hal sanno ka hor gelitaanka dugsiga barbaarinta. Isaga ama iyada waxay ugu dhaqmi karaan midaan garoonka, oo degdega, ee xarunta daryeelka maalinta ama carruurta kale ee dariska.



Macalinka ayaa kadib ku isticmaalaa aragtidaan waaya aragnimada carruurta iyo hormarka shaqsiga ee lagu qorsheynayo oo loola diyaarinayo shaqada carruurta.

## **Iskaashiga u dhaxeeyo waaladiinta iyo macalimiinta**

### **Iskaashiga**

#### **Collaboration**

Iskaashiga oo ay la jiraan macalinka iyo madaxa dugsiga iyo madaxa xarumaha dugsiga bixinta taageerada ugu wanaagsan ee ugu suurto galsan ee canugaaga oo ku xiranyahay masuuliyada waaladiinta.

### **La eg dugsiga barbaarinta**

#### **Prêt pour l'école enfantine**

Macalimiinta dugsiga barbaarinta ayaa la xiriiro waaladiinta bilowga sannadka dug-siga barbaarinta.

Barashada dugsiga barbaarinta iyo la kulanka macalinka ee maalinta booqashada waxay ku caawin kartaa canugaaga inuu hormariyo dareenka amniga ee agagaar-kan cusub.

Waxaad ka heleysaa soo jeedinada qaar ee qaababka loo taageero hormarka canugaaga iyo waxa ku caawin karo in canugaaga inuu qabsado bilow guul ah ee dugsiga barbaarinta ee buug-yaraha “La eg dugsiga barbaarinta” ama [www.be.ch/pret-pour-ecole-enfantine](http://www.be.ch/pret-pour-ecole-enfantine).

### **Warbixinta wadajirka ah**

#### **Echange d'informations**

Filashooyinka iyo hadafyada waxaa lagu xaqiijin karaa dhinaca isdhaafsiga guud iyo joogtada ee warbixinta iyo wadaha-lada. Carruurta waxay inta badan ku dhaqmaan si ka duwan dugsiga barbaarinta badelkii guriga. Waaladiinta iyo macalimiinta waxay isdhaafsadaan kormeerida iyo waaya aragnimada oo ay la jirto ujeedada faham wanaagsan ee canuga iyo sidaas darteeda siineyso isaga ama iyada taageero wanaagsan iyo dhiirogelin.

Macalinka ayaa kuu soo ogeysiinayo si degdeg ah oo joogta ah wax ku saabsan waxa ka dhacayo dugsiga barbaarinta.

Dugsiga barbaarinta wuxuu kugu taageerayaa barbaarinta iyo waxbarashada canugaaga. Haddii aad u baahantahay warbixin walba ama aad qabtid su'aalo walba ee ku saabsan dugsiga barbaarinta ama hormarka canugaaga, fadlan la soo xiriiir macalinka fasalka canugaaga.

### **Qaabab kala duwan ee iskaashiga**

#### **Différentes formes de collaboration**

Macalimiinta waxay sidoo ka, e go'aansan karaan qaabab kala duwan ee iskaashiga oo ay la jiraan waaladiinta (tusaale ahaan, maqribyada waaladiinta, waraaqaha ku socdo waaladiinta, wadahalada, dhacdooyinka waaladiinta iyo carruurta).

Dhacdooyinka dugsiga barbaarinta way awoodaan waaladiinta fursada lagu baranayo macalimiinta iyo midba midka kale wanagasan oo dhisaan aaminaada midba midka kale.

### **Kulamada wadahalada**

#### **Entretiens**

Kulanka wadahalada ee la isku dhaafsanayo warbixinta iyo afkaaraha ama xaqiijinta arimo walba ee laga codsan karo macalinka ama waaladiinta.

### **Kulanka waalidka-macalinka**

#### **Entretien de bilan**

Haljeer sannad walba, macalinka ayaa qabto kulanka waalidka-macalinka. Inta lagu jiro kulankaan, waaladiinta iyo macalinka waxay la wadaagaan kormeeradooda midba midka kale oo ka hadlaan wax ku saabsan hormarka canuga, hormarka waxbarashada, dabeecada shaqada sidoo kale sida xirfadaha gaarka ah iyo bulshada.

Mowduuca laga hadlay waxaa lagu qori karaa hoosta foomka ay diyaariyeen dugsiga si ay ugu adeegto sida diiwaanka kulanka. Foomka waxaa lagu xareynayaa qabanayo wargelinta qiimeynta dugsiga canugaaga sidoo kale.

### **Booqashooyinka**

#### **Visites des parents**

Booqashooyinka ee ku socdo dugsiga barbaarinta ee waaladiinta way soo dhowyihiin haddii lala sameeyo heshiiska macalinka.

Filashooyinka iyo hadafyada waxaa lagu xaqiijin karaa dhinaca isdhaafsiga guud iyo joogtada ee warbixinta iyo wadahalada.

## Hay'ada dugsiga barbaarinta

### **Dugsiga barbaarinta sida qeybka ah waxbarashada qasabka ah**

#### **L'école enfantine, le début de la scolarité obligatoire**

Dugsiga barbaarinta waa qeyb kaligeeda taagan ee waxbarashada qasabka ah, taas oo bilaash ah oo socotaa kow iyo toban sanno. Sida sharciga, dugsiga barbaarinta wuxuu socdaa labo sanno. Canug walba ee gaaraa da'da afar xiliga 31 Luuliyo ama ka ka hor galaa dugsiga barbaarinta Agoostada xigta. Da'da waa xaqiiqda go'aansiga ee gelitaanka.

Waaladiinta waxay leeyihiin iqtiyaarka lagu sugayo sannad ka hor ka diiwaangelinta canugooda sannadka koowaad ee dugsiga barbaarinta, sababaha heerka hormarka canuga. Haddii aad rabtid inaad ku dhaqantid iqtiyaarka, fadlan ku tilmaan midaan qaabka diiwaangelinta oo aad ka heshay maamulkaaga deegaanka. Haddii aad rabtid, waad la tashan kartaa madaxa dugsiga ka hor inta aadan sameynin go'aankaaga. Waxaad sidoo kale ka raadin kartaa tallo xafiiska la talinta waxbarashada, dhaqtarkaaga carruurta ama adeega tallada waalidka.

### **Saacadaha dugsiga barbaarinta**

#### **Horaires**

Tirada casharada dugsiga barbaarinta (45 daqiiq) isbuucii waxay ku xirantahay tirada isbuucyada dugsiga ee meeshaada aad dagantahay. Tusaale ahaan, oo ay la jiraan 38 isbuuc ee dugsiga casharada waxay iska badelaan inta u dhaxeyso 23 iyo 26 isbuucii, iyo gudaha 39 isbuuc ee dugsiga waxaa jiro inta u dhaxeyso 22 iyo 25 casharo isbuucii.

### **Yareynta waqtiyada waxbarashada ee sannadka koowaad ee dugsiga barbaarinta**

#### **Réduction du programme de la première année d'école enfantine**

Sannadka koowaad ee dugsiga barbaarinta canugaaga, waxaad heli kartaa tirada saacadaha canugaaga ka qeybgalo dugsiga barbaarinta ee la dhimay. Fadlan soo ogeysii madaxa dugsiga rabitaana-daada marka aad diiwaangelineysid canugaaga. Waqtiga barida laga yaabo inaan la dhimin wax ka badan hal sadex ka meel. Dooqaan waxaa loo habbeeyaa inay u ogolaato canugaaga in laga hordhaco waqtiga waxbarashada buuxo si tartiib ah.

Madaxa dugsiga ayaa go'aansadaa hay'ada ama tirada saxda ah ee yareynta waqtiga waxbarashada.

### **Ka qeybgalka dugsiga barbaarinta**

#### **Fréquentation de la classe**

Carruurta waxay si joogta ah uga qeybgalaan dugsiga barbaarinta ka bilow Isniinta illaa Jimcaha sida waafaqsan jadwalka waqtiga la bixiyay. Tilmaamaha dugsiga barbaarinta waxay bilaabataa oo dhammaataa isla waqtiyada subixii sida dugsiga (saacadaha "joojinta"). Casharada sidoo kale waxaa la qabtaa galabkaa hal ama labo jeer isbuucii.

Hubi in canugaaga imaado casharada oo si wanaagsan u nastay. Hubi in canugaaga labisanyahay oo la yimaado wax walb oo looga baahanyahay casharada, iyo sidoo kale dhacdooyinka gaarka ah ama banaan aadida.

## **Safarka aadida iyo ka imaanshaha dugsiga barbaarinta**

### **Trajét pour se rendre à l'école**

Waaladiinta ayaa masuul ka ah carruurtooda ee banaanka ka jiro saacadaha dugsiga barbaarinta iyo iyaga oo wadadooda hayo ee u socda ama ka imaanayo dugsiga barbaarinta. Ku caawi canugaaga inuu barto wadada aado dugsiga barbaarinta oo soo laabato si markaas isaga ama iyada ugu suurtoogaleysa inay aadaan safarka kaligood maalin ka mid ah.

## **Maqnaashaha**

### **Absences**

Fadlan soo ogeysii macalinka maqnaanshaha la saadaalin karo (tusaale ahaan, sababaha sida jirada ama shilka saameynayo canuga ama qoyska, isbadelka deegaanka, dbalamaha dhaqtarka) ee waqtiga la joogo, laakin sida hubaalka ah ka hor bilowga casharka. Haddii canugaaga jiranyahay, tusaale. qabo qandho ama dareemo lalabo, isaga ama iyada waa inay guriga joogaan illaa si buuxdo u soo kabsadaan.

## **Ka dhaafida**

### **Dispenses**

Ka dhaafida waxaa kaliya oo la ansixin karaa haddii codsi qoran oo sheegayo sababaha wakiilnimada in loo gudbiyo madaxa dugsiga afar isbuuc oo horeyso. Kadhaafida waxaa lagu bixin karaa kaliya sababaha sida xigta: dabaaldagayada ala bariga diimaha, dhacdooyinka qoyska muhiimka ah, ka qeybgalka koorsada ee luuqada dhaladka ah iyo dhaqanka (LCO).

## **Bilaash maalmaha barkoodada**

### **Demi-journées libres**

Canugaaga wuxuu xaq u leeyahay illaa shan maalmo barkeeda bilaash ah ee sannad dugsiiyeed walba. Isaga ama iyada way ka maqnaan karaan casharada ee maalmahaan barka ah iyada oo aan la dhiibin wax sabab ah. Waa inaad ogeysiisaa macalinka fasalka xili hore haddii aad rabtid inaad sheegatid maalin barkeeda bilaash ah ee canugaaga. Maalmaha barkooda waxaa loo qaadan karaa midkood hal ahaan ama si isku xigto.

## **Gelitaanka dugsiga hoose**

### **Passage au degré primaire**

Sida sharciga, dhammaan carruurta waxay bilaabaan sannadkooda 1aad ee dugsiga hoose kadib ku isticmaalida labo sanno dugsiga barbaarinta, tusaale ahaan, Sannadka 3aad ee dugsiga. Xaaladaha aan caadiga aheyn – gaar ahaan, sabab la xiriirto heerka hormarka shaqsiga canuga – canuga wuxuu bilaabi karaa dugsiga hoose sannad ka hor ama sannad kadib. Xaaladaan, go'aanka waxaa sameeya madaxa dugsiga ee codsiga macalinka iyo la tashiga waaladiinta.

Macalimiinta dugsiga barbaarinta iyo macalimiinta sannadka sadaxaad way wada shaqeeyaan. Mashaariicda wadajirka ah iyo maalmaha booqashada waxay u ogo-laataa iyaga inay u diyaariyaan carruurta dugsiga hoose oo fududeeyaan ku meelgaarka.

## **Daryeelka iyo caafimaadka canuga**

### **Dugsiga maalinta**

#### **Ecole à journée continue**

Dugsiyo badan ayaa bixiyaa “dugsiyada maalinta” (Tagesschulen: barnaamijyada daryeelka carruurta galabka) kaas oo dhammeystiri karo dugsiga barbaarinta. Kuwaan waxay bixiyaan kormeerida inta lagu jiro muddada maalinta (oo ay la jirto qado) iyo galabka markii dugsiga barbaarinta dhammaado. Ka qeybgalka maalinta dugsiga waa iqtiyaar. Waaladiinta waxay ku deeqan qarashaadka kormeerida iyo cuntada sida waafaqsan daqligooda.

Madaxa dugsi walba wuxuu kuu sheegi karaa dhabtii waxa halkaas laga bixiyo. Warbixinta guud ee maalmaha dugsiga waxaa laga heli karaa:

[www.be.ch/eoffres-complementaires-ecole](http://www.be.ch/eoffres-complementaires-ecole)

Suurtogalnimada dheeraadka ah ee daryeelka canuga iyo kormeerida ka baxsan qoyska (xarumaha daryeelka maalinta ee carruurta, daryeel bixiyayaasha xirfadlaha, iwm.) waxaa laga heli karaa:

[www.fambe.sites.be.ch/fr](http://www.fambe.sites.be.ch/fr)

### **Baaritaanka caafimaadka**

#### **Contrôle médical**

Baaritaanka caafimaadka iyo baaritaanka ilkaha sannadlaha ee ay sameeyaan dhaqtarka ilkaha waa qasab oo bilaash ayay u tahay carruurta ku jiro dugsiga barbaarinta. Dhaqtarka wuxuu ku soo ogeysiinayaa haddii daaweyn walba ay muhiim tahay. Waaladiinta ayaa masuul ka ah qarashaadka daaweyn noocaas ah.

## Madaxa dugsiga, maamulada iyo adeegyada la gaareeyay

### Madaxa dugsiga

#### Direction d'école

Madaxa dugsiga ayaa masuul ka ah waxbarashada iyo maamulida hay'ada ee dugsiga iyo dugsiga barbaarinta. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ee ku saabsan qeybaha hay'ada ee dugsiga ama xaalada aan lala xalin karin macalinka, waxaad kala hadli kartaa madaxa dugsiga.

### Maamulka deegaanka

#### Autorité communale

Awooda maamulka deegaanka ayaa masuul ka ah hubinta in carruurta ka qeybgalaan dugsiga barbaarinta sida waafaqsan sharciyada dowlada iyo xeerarka deegaanka.

### Kormeeraha dugsiga

#### Inspection scolaire

Kormeeraha dugsiga goboleedka ayaa kormeera waxbarashada qasabka ah ee dowlada.

### Adeegyada cilmi nafsiga ee

#### carruurta iyo qaangaarka

#### Services psychologiques pour enfants et adolescents (SPE)

Xafiiska la talinta waxbarashada dowlada ee gobolkaaga wuxuu kaala talin karaa gaar ahaanada ee hormarka canugaaga iyo su'aalaha waxbarashada gaarka ah: [www.be.ch/spe](http://www.be.ch/spe)

Warbixin dheeraad ah ee waxbarashada qasabka ah waxaa laga heli karaa: [www.be.ch/ecole-obligatoire](http://www.be.ch/ecole-obligatoire)



